ICRC

SOOMALIYA

# WARSIDAHA SUGNAANTA DHAQAALAHA



Tobaneeyo sano oo dagaallo iyo masiibooyin dabiici ah ayaa si weyn u saameeyeen u adkeysashada inta badan ee dadweynaha Soomaaliyeed. Waxay sidoo kale carqaladeeyeen oo waxyeelleeyeen hab-nololeedyadoodii iyo xeeladihii caadiga ahaa ee lagula tacaalayey. Sidaas darteed, inta badan qoysaska Soomaaliyeed ee ay saameysay colaadda ayaa weli ah kuwa aad u liita oo ay sii wadaan halganka maalmeed sidii ay u dabooli lahaayeen baahiyahooda aasaasiga ah.

Si loo yareeyo saameynta xun ee dhibaatooyinkaas soo noqnoqoda iyo si dadweynaha ugu saameynta badan laga dhigo kuwa u adkeysiga badan iyo kuwa dhaqaale ahaan isla filan ayaa ICRCdu, iyadoo isticmaalayso waaxdeeda Sugnaanta Dhaqaalaha, sannado badan horumarinaysay barnaamij laba ujeeddo leh:

- In la hubiyo in dadka nugulka ah ay helaan cunto, xaalad nololeed iyo in la daboolo baahiyahooda kale ee aasaasiga ah.
- In dhaqaalaha dib loo soo nololeeyo iyada oo la taageerayo dib-u-soo kabashada hab nololeedka si loo xoojiyo adkeysiga dadweynaha sida daran u saameysan.

Qaab-dhismeedka jawaab celinta ayaa muujinaya in ICRC aysan ahayn hay'ad diiradda kaliya saareysa waxqabadyada degdegga ah ee bani'aadamnimada, waxaa sidoo kale si weyn uga go'an tahay inay gacan ka geysato dhisidda adkeysiga bulshada iyadoo dib loo soo celinaayo hab-nololeedka lana xoojinayo awoodaha heerka qoyska, bulshada iyo qaab dhismeedka.

Ujeeddada gargaarka deg-degga ah waa in lagu suuro galiyo in dadka ugu nugul – barakacayaasha, kuwa soo laabanaya, bulshooyinka martigeliyey iyo dadka ku nool meelaha ay saameeyeen colaadaha iyo/ama masiibooyinka dabiiciga ah - loo daboolo baahiyahooda aasaasiga ah sidii ay u baahan yihiin marka la eego heerka jirkooda, deegaankooda iyo dhaqankooda. Gargaarkaan deg-degga ah waxaa loo qaybiyaa lacag ahaan ama alaab ahaan sida cunto iyo/ama waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qoyska.

Ujeeddada taageerada dib-u-soo nololeynta dhaqaalaha waa in awood la siiyo isla dadweynihii, marka baahiyadooda aasaasiga ah la daboolo, inay dib-u-soo celiyaan hab-nololeedkooda, kor u qaadaan wax soo saarka dhaqaalahooda, daboolaan kharashyadooda muhiimka ah ayna noqdaan kuwa u adkeysta caqabadaha hadda jira iyo dhibaatooyinka mustaqbalkaba.

Si ujeeddadaasi la gaaro, waxaa la horumarinayaa mashruucyo kala duuwan oo kala ah kaalmaynta wax soo saarka beeraha iyo xoolaha, abuurista dakhliga, dhismaha awooda farsamada iyo hal abuurka.

Himiladeena ayaa ah in aan awood u siinno dadka aan caawineyno inaysan kaliya ka badbaadin dhibaatooyinka, in ay sidoo kale u adkeystaan ayna ka soo kabtaan oo ay awoodaan in ay ayaga naftooda is beddelaan, in ay beddelaan xaaladdooda dhabta ah iyo noloshooda.

ICRC waxaa ka go'an inay taageerto dadka Soomaaliyeed ee ugu nugul inta lagu guda jiro xoojinta awoodooda isbeddelka wanaagsan oo waara oo lagu heli karo sugnaanta dhaqaale, in kasta oo ay jiraan dagaallada daba dheeraaday iyo masiibooyinka dabiiciga ah ee soo noqnoqda.

# BARNAAMIJYADA

## TAAGEERADA DAKHLIGA

ICRC waxay higsaneysaa in ay siiiso sugnaan dhaqaale dadka ay saameyeen colaadaha iyo xaaladaha kale ee rabshadaha. Gaar ahaan, waxay taageereysaa qoysaska reer magaalka nugulka iyo saboolka ah oo ay inta badan haweenka hormuud u yihiin iyo kooxaha la xaqiro iyo sidoo kale bulshooyinka nugul xeebaha iyo reer miyiga kuwaas oo ku tiirsan kalluumeysiga iyo dhaqashada shinnida.




Barnaamijkeena caawimaada lacagta caddaanka ah wuxuu haweenka ka caawiyaa inuu buuxiyo baahiyaha qoysaskooda

Iyada oo loo maraayo taageerada dhaqaalaha yaryar, ayaa ICRC waxay hor-u-marisaa qoysaska nugul ee dakhligoodu hooseeyo si ay u bilaabaan, dib ugu bilaabaan, ama ay u ballaariyaan meherado yaryar oo wax ku biirin kara dakhliga qoyska, ugu dambeyntiina horseeda hab-nololeed horumarsan oo waarta. Kuwaani waxay ka kooban yihiin hal ama isku darka saddex wax-ka-qabasho: deeqaha wax soo saarka leh, tababar xirfadeedka iyo taageerada amaahda yaryar. Ujeeddada saddexda qayboodba waa in la taageero dhaqdhaqaaqyada dakhli-soo-saarka ee ka imanaya beeraha iyo dhaqashada xoolaha illaa ganacsiga iyo farsamada. Intaas waxaa sii dheer, waxaa loo fulin karaa si shaqsiyadeed (qoys-ku-saleysan) ama mashruuc ah (bulsho ahaan loo abaabulay).

Marka loo eego xaaladda Soomaaliya, qaybta ugu weyn ee mashruuca amaahda yaryar ee la hirgaliyay waxay diiradda saareysaa deeqaha wax soo saarka leh ee lagu beegsanayo qoysaska nugul oo haweenka hormuud u yihiin. Si loo wanaajiyo dakhligooda loogana caawiyo qoysaska inay daboolaan baahiyahooda daruuriga ah, taageero qaabkeedu yahay deeqo wax soo saar leh oo ay weheliso tababar ku saabsan xirfadaha ganacsiga ayaa la bixiyaa.

Marka lagu daro qoysaska haweenka hormuud u yihiin oo ah bartilmaameedka koowaad ee dadaallada dhaqaalaha yaryar, ICRC waxay bulshooyinka nugul reer miyiga ah iyo kalluumeysatada xeebaha ku taageertaa qalabka dhaqashada shinnida iyo qalabka haynta iyo maalgelinta wax soo saarka kalluumeysiga. Qalabka kalluumaysiga waxaa ka mid ah xirmo qalabka kalluumaysiga ah, doonyaha, matoorrada doonta iyo qaboojiyeyaasha ku shaqeeya qorraxda kuwaas oo loo qaybiyo bulshooyinka. Qalabka sida doonyaha iyo matoorrada doonta waxaa wadaagaaya qoysas bulshada ku dhex jira. Qaybinta xirmooyinka qalabka kalluumeysiga iyo qalab kale ayaa loogu talagalay in lagu suurogeliyo bulshada inay kordhiyaan wax soo saarkood maalinlaha ah.

Dhaqashada shinnida, taageerada la bixiyo waxaa ka mid ah qalab ay ka mid yihiin guri-shinni casri ah, dharka la isaga ilaaliyo shinnida iyo qalabka lagama maarmaanka u ah hagaajinta tayada wax soo saarka shinnida iyo iibka. Tan waxaa lagu dara dhisidda aqoonta xirfadda farsamo oo takhasuseyaal fuliya si bulshada kor u qaaddo soo saarkeeda. Kooxo loo tababaray cawimaad iyo habnololeed oo ka tirsan Ururka Bisha Cas (SRCS) oo dalka oo dhan ayaa ka qayb qaadanaya tallaab kasta wixii ladu magacaabo wareegga soo-saarka, laga bilaabo xalad qiimeynta, diwaan gelinta, qaybinta iyo qiimeynta qaybinta iyo natiijooyinka ka soo baxay.




Mire wuxuu diyaarinayaa kalluun si uu uga iibiyo dadka ganacsatada ah oo isaga ku sugaya xeebta

# BEERAHA




ICRC-du waxay ku taageertaa beeralayda qalabka gacan-qabadka ah iyo midka waa weyn

Soomaaliya beeruhu waa qayb dhaqaale oo muhiim ah mana aha kaliya marka laga hadlayo daboolidda baahiyaha cuntada ee dadweynaha laakiin sidoo kale marka laga hadlayo abuurista dakhli iyadoo loo marayo iibka dalagga iyo fursado beero ka shaqeyn ah. Halkaan, waxqabadyada soo kabashada iyo dhaqancelinta ee ICRCdu waddo waxay ku salaysan yihiin hababka loo kordhin lahaa soo saarka cuntada iyo u adkeysiga dhibaatooyinka mustaqbalka iyadoo loo marayo barnaamijyo muddada fod ah oo fududaynaya kala-guurka mid gargaar ah una gudbaya mid horumar ah.

Soomaaliya gudaheeda, ICRC waxay ka fulisaa saddex mashruuc oo waaweyn oo dhinaca beeraha ah:

- Kordhinta iniinyo tayo leh iyo u qaybinta iskaashatooyinka beeraha degaanka aqoon/qalabka beeraha (kuwaas oo ka mid ah cagafyo, mashiinada abuurka, yaambada falka lagu rakibo cagafka, qalab ciidda dhagax ka saara, iniinyo, bacrimin, bacaha lagu kaydiyo abuurka, qoyaab beeg/qoyaan cabire, tababaro faramada wanaagsan ee cilmiga beeraha)
- Barnaamijka soo-kabashada beeraleyda nugulka ah sidii looga caawin lahaa inay dib-u- soo celiyaan wax soo saarkooda cuntada "xilliga caadiga ah" (heerarka mudadii dhibaatada ka hor). Tan waxaa lagu gaaraa iyada oo loo marayo bixinta deeqaha lacagta caddaanka ah.
- Dayactirka mashaariicada waraabka, waaraha iyo garoomada diyaaradaha (tusaale ahaan, garoonka Baardhere) oo lagu hirgeliyay mashaariic shaqo-lacag-ku bedelasho.




Masagadu (hadhuudhka) waa dalag caan ka ah beeralleyda Soomaaliyeed waana cuntada aasaasiga u ah  inta badan guryaha miyiga

# XOOLAHA

Qaybta dhaqashada xoolaha ee Soomaaliya waa mid ka mid ah hab-nololeedyada ugu muhiimsan ee bulshooyinka iyo xoola-dhaqatada. Nasiib darrose waxaa wiiqay masiibooyinka soo noqnoqda iyo isku dhacyo daba dheeraaday oona uga sii daray burburkii adeegyada xannaanada xoolaha ee dowladda. Intaa waxaa u dheer, la'aanta helitaanka adeegyada aasaasiga ah ee xoolaha iyo sahayda daawooyinka xoolaha oo aan ku filneyn ayaa dhalisay daryeelka caafimaadka xoolaha oo liita iyo sidoo kale wax soo saarka xoolaha oo hooseeya. Dhibaatooyinkaasi waxay saameyn ku leeyihiin geedi socodka guud ee horumarka dhaqaalaha iyo shaqeynta in ka badan 75% bulshada Soomaaliyeed ee ku tiirsan xoolaha.

Nidaam dhaqameedka wax soo saarka xoolaha wuxuu ku tiirsan yahay xoola-dhaqatada taas oo u baahan dhaq-dhaqaaqa xoolaha si ay u helaan biyo iyo daaq cusub. Maalmahan, la-qabsashada xoola-dhaqatada waxaa si xun saameya isbadallada aan la saadaalin karin ee xaaladaha cimilada iyo xaalufinta deegaanka. Xoola-dhaqatadu badanaa way ka dhintaan xoolaha inta lagu guda jiro abaarta, taas oo sida caadiga ah dib uga soo kabsadaan sanadaha xiga. Laakiin jilaalka daba dheeraaday oo soo noqnoqday ayaa ku reebtay tiro aan caadi ahayn oo dad ah oo noqday ku dhowaad ama gebi ahaanba xoolo la'aan ah, iyo qatarta roob la'aanta ama roobab mahiigaan ah oo dila xoolahaas oo ka badbaaday musiibooyin.

Laakiin, abaaro daran iyo xaalufinta daaqa ka sokow, xoola-dhaqatadu waxay la kulmaan caqabado kale sida geeddiga xoolaha la xiriira amni darro keeni kara haalista dhaca xoolaha, xiisadaha ka jira dhul daaqsiinta iyo ilaha biyaha, helitaanka daawooyinka xoolaha iyo adeegyada, xoola-dhaqatada oo aqoontoodu liidato, helitaanka calafka xoolaha oo liita iyo waxyaabaha kale oo beeraha laga soo saaro.

Si wax looga qabto caqabadahaas, barnaamijka xoolaha ee ICRC wuxuu diiradda saarayaa hagaajinta adeegyada xannaanada xoolaha iyo caawinta wax soo saarka cunnada iyada oo loo maraayo:

- Tababbarka iyo taageeridda shaqaalaha bulshada ka mid ah oo u qaabilsan caafimaadka xoolaha iyo farmaasiga xoolaha gaarka loo leeyahay. Tan waxaa loogu golleeyahay in lagu wanaajiyo xirfadahooda una suurtagaliyo inay qoysaska reer guuraaga iyo beero-iyo-xoola dhaqatada ah siiyaan adeegyada daryeelka caafimaadka xoolaha oo tayo leh.

- Si loo yareeyo khasaaraha dhaqaale ee qoysaska xoolo-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada ah sababo la xiriira cudurka Gosha ee Xoolaha Afrika (Africa Animal Trypanosomiasis (AAT)) oo ah cudur faafiyo gendiga oo waxyeelleeya xoolaha la dhaqdo ayaa waxaa la hirgeliyey mashruuca xakamaynta Gosha iyo Gendiga.

- Mashruuca wax soo saarka calafka xoolaha ayaa waxaa laga hirgaliyay dhulka webiyada maraan dhaqdhaqaaq dakhli abuur ahaan iyo hab kor loogu qaado wax soo saarka xoolaha, iyo sidoo kale in la helo awood dakhli looga abuuro xoolo-dhaqatada oo ka tagaya xoolahooda oo noqonaya dad ka shaqeeya beeraha.




Taageerada xoolaha ee loo fidiyo bulshooyinka xoola-dhaqatada ah ayaa waxay ka caawisaa sidii ay xoolahooda u ahaan lahaayeen kuwo caafimaad qaba

# BARNAAMIJKA XAWILAADDA LACAGTA CADDAANKA AH

Barnaamijyada Xawilaadda Lacagta Caddaanka ah (CTP) waxay gargaar ku bixiyaan lacag caddaan ah iyo/ama kaarar la siiyo shakhsiyaad iyo qoysas. Waa hab si ool ah kaalmada loogu qaybiyo dadka loogu talagalay, taas oo awood u siineysa inay helaan waxyaalaha iyo adeegyada ay u baahan yihiin.




Lacagta caddaanka ah ayaa waxaa si toos ah loogu diraa taleefanka gacanta ee qoyska. Nidaamkan waa mid sugan oo hufan.

Runtii, xawaaladaha lacagta caddaanka ah waxay yihiin qaab wax ku ool ah oo lagu taageerayo dadka ay dhibaatadu saameysey si ay u daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah iyo kuwa degdegga ah, iyo sidoo kale baahiyahooda muddada fog (mashaariicda taageerada hab-nololeedka). Lacagta caddaanka ah waxaa loo isticmaalaa in lagu daboolo baahiyo badan oo kala duwan sida kuwa aasaasiga ah – cuntada, biyaha, hoyga, waxbarashada carruurta – iyo hagaajinta hab-nololeedka iyadoo loo maraayo beeraha, wax soo saarka xoolaha ama hal-abuur ganacsi.

Adeegsiga Barnaamijka Xawilaadda Lacagta Caddaanka ah (CTP) ayaa sannadihii ugu dambeeyay sii kordhayay. Waqtigaan 67% howlaha gargaarka ICRC-da Soomaaliya waxaa lagu fuliyaa iyada oo la adeegsanayo xawilaadda lacagta caddaanka ah. Sababaha kor loogu qaadayo waxqabadyada loo adeegsado lacagta caddaanka ah ayaa waxaa ka mid ah gaaritaan wanaagsan meelaha ay colaadu saameysey, sidoo kalena waa aqoonsi wanaagsan oo loo yeeshay sharafta dadka, awooddooda, ismaamuliddooda iyo ikhtiyaarkooda si ay u maareeyaan badbaadadooda iyo soo kabashadooda. Barnaamijyada lacagta caddaanka ah ayaa sidoo kale bilaabaya, joogteeya ama dib ugu soo celiyaan ka qayb-galka maaliyadda guud aafooyin ama isku dhacyo ka dib. Intaa waxaa dheer, bixinta lacagta caddaanka ah waxay kicisaa suuqa maxalliga/dhaqaalaha isla markana si weyn hoos u dhigaysaa waqtiga waxqabadka. Marka lacagta caddaanka laga bixiyo xawilaadda telefoonka gacanta taasi waxay baabi'ineysaa khatarta ka imaan kara marka dad kale ay ogaadaan in qofkaasi lacag intaas ah loogu wareejiyey.




Muslimah Ciise waxay falkineysaa dambiilo si ay u fuliso dalabaad ay ka heshay macaamiisheeda ku sugan Bakaaraha, oo ah mid ka mid ah suuqyada ugu waaweyn Muqdisho

ICRC waxay leedahay koox khubaro ah oo qaabilsan Barnaamijka Xawilaadda Lacagta Caddaanka ah (CTP) kuwaas oo bixiya taageero farsamo, talo iyo hab fulinta. Kooxda ayaa waxay sameysaa qiimeynta suurtagalnimada, naqshadeynta mashruuca, diiwaangelinnada, xaqiijinta ka-faa'iideystayaasha, diyaarinta qeybinta, xulashada adeeg bixiyeyaasha, ugu dambeyntina kor-joogteynta. Lacagta caddaanka ah waxaa badanaa lagu bixiyaa telefoonka gacanta iyadoo si adag ah loo xushay bixiyeyaasha adeegga maaliyadeed. Waxay hay'addu awood u siineysaa in ay yareeyso khatarta lagu eedeyn karo isla-xisaabtan iyo daah-furnaan la'aan oo la xiriira bixinta gargaarka bani'aadaminimada.




Sarkaal la hadlaya koox intii lagu guda jiray kulamo tababar oo ku saabsan xirfadaha ganacsiga

# DHISIDDA AWOODA

Shaqaalaha Qaybta Sugnaanta Dhaqaalaha ama la-hawlgalayaal qandaraas la siiyey ayaa tababaro siisya:

**Ka-faa'iideystayaasha** – ujeeddada tababarada waxay tahay in kor loogu qaado xirfadda ka-faa'iideystayaasha qaybo kala duwan ee aqoon. Tababarrada ku saabsan xirfadaha ganacsiga ayaa looga golleeyahay in lagu diyaariyo dadka ka qayb gala barnaamijka taageerada dakhliga iyada oo la adeegsanayo aqoonta xisaabinta iyo iyo xirfadaha maaraynta ganacsiga aasaasiga ah. Tababarro ku saabsan mowduucyo khaas ah sida maaraynta iskaashatada iyo farsamooyinka beeraha wanaagsan ayaa waxaa bixiya machad farsamo oo maxalli ah oo qandaraas lagu siiyey - Kooxda Farsamada Beeraha ee Soomaaliya (SATG).

**Shaqaalaha Ururka Bisha Cas (SRCS) iyo mutadawiciinta** - ICRC waxay Soomaaliya kala shaqaysaa Ururka Bisha Cas hawlgaladeeda bani'aadamnimo. Tababarro ku saabsan mawduucyo gaar ah ayaa loo qabtaa shaqaalaha iyo mutadawiciinta Bisha Cas. Waaxda Sugnaanta Dhaqaalaha ayaa tababar siisay mutadawiciinta Ururka Bisha Cas oo ku sugan dhammaan laamaha gobollada Soomaaliya (iyo qaar ka mid ah laamo hoosaadyada sida Dhoobley) oo ujeeddaduna ay tahay in la abuuro koox ka hawlgalayso gargaarka iyo hab-nololeedka. Kooxdaan iyo kooxaha ICRC ee waddanka ka shaqeeya waxay qabtaan hawlo wada jir ah sida qiimaynta, diiwaangelinta, la socoshada qaybinta gargaarka ka dib iyo dib-u-eegista guud mashruuca oo dhan.

# DAAH-FURNAANTA IYO ISLA XISAABTANKA

Si loo hubiyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka hawlgalada aan la leenahay dadka dhibaatadu saamaysay, waaxda Sugnaanta Dhaqaalaha, iyada oo iskaashi dhow la leh Qaybtsa Isla-xisaabtanka/Kormeerka Mashruucaha (RMU), waxay dejisay nidaamyo dadka dhibaataysan iyo kuwa wax loo qabanayo inay jawaab ka bixiyaan hawlgaladeena. Nidaamka jawaab ka bixinta iyo cabashooyinka ka-faa'iideystayaasha ayaa loo yaqaan Xarunta la Xiriirka Bulshada (CCC), waxay bulshada siisaa qaab ay ku bixiso jawaab-celin, cabasho ama codsiyo la xiriira howlaha ICRC ka wado degaannadooda. Waxaa sidoo kale loo isticimaalaa farriimo telefoonka gacanta loogu diro ka-faa'iideystayaasha la xushay oo la taageeri doono wuxuuna ku wacyi-geliynaya taageerada dhammeystiran ee ay ka filan karaan ICRC-da. Waxaan hubinaa in bulshooyinka ay ku lug yeeshaan kana warqabaan howlaheena kala duwan. Tan waxaa lagu gaaraa iyada oo laga qayb gelinayo bulshooyinka ay dhibaatadu saameysey falanqaynta dhibaatada iyada oo loo marayo wareysiyo xog-ogaal ah, dood kooxeed arrin gaar ku saabsan iyo wareysiyada lala yeesho qoysaska. Cabashooyinka iyo walaacyada ka imanaya dadka ay dhibaatadu saameysey ee la xiriira waxqabadyadeeny ayaa loo xalliyaa si ku habboon iyo jawaab-celinta natiijooyinka ayaa shakhsiga ama shakhsiyaadka saameysan loo gudbiyaa iyada oo loo marayo Xarunta la Xiriirka Bulshada.

**Ka-faa'iideystayaasha ayaa si toos ah ula xiriiri kara ICRC iyaga oo adeegsanaya lambarka gaaban ee lacag la'aanta ah (373) oo laga heli karo dhammaan shabakadaha isgaarsiinta Soomaaliya.**



Eric Chege/ICRC

Shaqaale ka tirsan ICRC oo ku sugan Xarunta Xiriirka Bulshada kuna hawlan wicitaan. Xaruntu waxay bulshooyinka siisaa qaabab ay ku bixiyaan jawaab-celin

# WAREYSI FOOL -KA- FOOL AH OO LALA YEESHAY CABDULLAAHI CIISA CALI JAAMAC, SARKAALKA SUGNAANTA DHAQAALAHA OO KA SHAQEEYA GAROOWE

Cabdullaahi Ciise Cali Jaamac waa sarkaal ka shaqeeya waaxda Sugnaanta Dhaqaalaha ee Garoowe wuxuuna ka shaqeeyaa gobollada Nugaal, Bari iyo Waqooyiga Mudug ee Soomaaliya

**S: Adiga oo ah sarkaalka Sugnaanta Dhaqaalaha maxaad qabataa?**

**J:** Sarkaal waddanka ka shaqeeya ahaan doorkeyagu waxa waaye booqashada dhibbanayaasha ay saameeyeen iskahorimaadyada hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaasaha si aan u qiimeeyo xaaladdooda iyo awooddooda ay kaga soo kaban karaan dhibaatooyinkaas caawimaad dibadeed la'aanteed. Markaas ka dib aniga iyo iyaga, ayaa isla aqoonsannaa noocyada faragalinta habboon ka hor inta aanan u hirgelinin iyaga.

**S: Maxay yihiin waxqabadyada gargaarka ee degaannada aad ka hawlgasho sannadka 2019?**

**J:** Sanadkaan, iskudhacyo iyo dhibaatooyin la xiriira cimilada oo isbiirsaday ayaa saameysay dadka ku nool degaannada aan ka hawlgalo. Dadka waxaa si daran u saamaysay helitaanka cuntada, xaaladaha -nolosha iyo hab-nololeedyada. Tani waxay keentay in qaar ayaga ka mid ah ay u guuraan isla gobolladooda dhexdooda sida dad gudaha ku barakacay. Waxaan ku caawinnay gargaar degdeg oo cunto ah iyo waxaan taageernay xaaladdooda nolosha iyada oo la hirgaliyay mashaariic lacag caddaan ah iyo dib-u-soo kabasho.

**S: Sidee ayey ICRC u caawisaa bulshooyinka ay saameysay iska-horimaadyada iyo dhibaatooyinka la xiriira cimilada si ay uga soo kabsadaan una joogteeyaan hab-nololeedkooda?**

**J:** Haddii dhibaatooyinka ugu waaweyn ay yihiin la'aanta helitaanka cuntada, xaaladaha nolosha oo liita iyo baahiyaha kale ee mudnaanta leh, waxaan ka caawinaynaa deeqaha lacagta caddaanka ah oo dhowr jeer la bixiyo ama qaybinta raashiinka iyo/ama xirmooyinka ku jira waxyaabaha aan cuntada ahayn. Haddii baahiyuhu inta badan la xiriiraan hab-nololeedka iyo dakhliga, waxaan ka caawinaynaa mashaariicda ka soo kabsashada hab-nololeedka sida wax soo saarka malabka, mashaariicada kalluumeysiga, deeqaha soo kabashada beeraha ama howlaha dakhliga dhaliya.

**S: Sidee xaaladda amniga ee degaankaaga u saameysaa fulinta howlaha?**

**J:** Had iyo jeer culeys weyn ayey ku tahay ICRC inay howlaheeda ka fuliso Soomaaliya, ha ahaato sababo la xiriira amni, ama habka lagu gaari lahaa meelaha aan ka howlgalno, amaba isuduwidda. Si kastaba ha ahaatee, xiriir wanaagsan oo lala yeeshay dhammaan




Cabdullaahi Ciise (dhanka midig) oo tababar ku saabsan sida aaladda tablet-ka loogu sameeyo diiwaangelinta siinaya mutadawiciinta Ururka Bisha Cas(SRCS) ka hor inta aan bilaaban diiwaangelinta

dadka khuuseeya iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ayaa waxay keentay si weyn nala aqbalo dhanka bulshada taasoo noo oggolaaneyso in howlaheena si fudud aan u hirgelinno. Intooda badan dadku runti way fahmaan in aan kaliya u shaqeyno si aan u caawino dadka ay dhibaatadu saameysey shaqadaasina ay ku saleysan tahay mabaadi'dayada.

**S: Wax nooga sheeg mashruuca bulshada kalluumeysiga ee degaanka aad ka hawlgasho?**

**J:** Bulshooyinka kalluumeysatada ah ee ku nool degaanka aan ka hawlgalo ayaa waxaa saameeyey xiisadda daba-dheeraatay ee sababay la'aanta ama hoos u dhaca baaxadda leh ee wax-soo-saarka kalluunka. Wax-soo-saarka kalluunka oo yaraadey ayaa carqaladeeyey sugnaanta cuntada iyo dhaqaalaha iyo awoodda lagu daboolayo baahiyaha aasaasiga ah. Iyada oo loo qaybinayo qalabka kalluumeysiga iyo aaladaha ka shaqeeya qoraxda si ay hawlahooda dib ugu bilaabaan dibna u soo kabsadaan sugnaanta dhaqaalahooda ayaa ICRC waxaa ka go'an inay ku caawiso bulshooyinkaas sidii ay dib ugu soo kaban lahaayeen xeelka hab-nololeedka ee aadka u muhiimka u ah.

**S: Waa maxay shuruudaha xulashada ka-faa'iideystayaasha loogu talagalay wax ka qabadyada gargaarka iyo lacagta caddaanka?**

**J:** Shuruudaha xulashada waxay ku saleysan yihiin fikradda nuglaanta. Laga soo bilaabayo iyada oo si mideysan loogu banbaxaayo dhibaatooyinka, iyado oo bulshooyinka nagu raacsan yihiin waanu isku deyeynaa, in aan xulanno qoysaska iyo shakhsiyaadka sida ugu badan ay u saameysay dhibaatada isla markaana leh karti yar si ay iskood uga soo kabsadaan anagoo aan ku sameynin wax faragelin ah.

# NAFAQADA

Iyada oo loo marayo isuduwid dhow oo ay weheliso kooxda caafimaadka ICRC, sugnaanta dhaqaalaha waxaa ka mid ah qiimeynta xaaladda nafaqada iyada oo loo marayo ka hortagga iyo daaweynta. Kooxaheenna, iyaga oo kaashanaya Ururka Bisha Cas (SRCS), waxay sameeyaan sahamin nafaqo oo joogto ah oo loogu talagalay carruurta ka yar shan sano jirka iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya. Mar haddii la aqoonsado kiisaska nafaqo-xumada, waxaa jira saddex nooc oo wax loo qaban karo iyada oo la eegayo heerka nafaqo-xumada: waxaa loo gudbiyaa barnaamijka quudinta dheeriga ah si laga daaweyo nafaqo-xumada dhexdhexaadka; ama barnaamijka cunto ku daaweynta bukaan-socodka si laga daaweeyo nafaqo-xumada daran; ama xarunta xanaanada degdegga haddii xaladda ay aad u daran tahay si laga daaweeyo cudurro ka dhasha nafaqo-xumo daran. Tan waxaa la sameeyaa iyadoo lala kaashanayo waaxda caafimaadka ee ICRC. Si loo xakameeyo dhibaatada nafaqo-xumada ee ka jirta Soomaaliya, ICRC-du waxay taageereysaa caruurta ka yar 5 sano iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya iyaga oo la siinaayo kaarar raashin iyo cunto nafaqo leh oo lagu daaweyo nafaqo-darrida waxaana sidoo kale la qabtaa kulamo waxbarashada cuntada iyo nafaqada oo loogu talagalay in lagu wanaajiyo aqoonta dadweynaha ee ahmiyada ay leedahay cunto qadashada nidaamsan.


Abdikarim Mohamed/ICRC

Carruurta, gaar ahaan kuwa shan sano jirka ka hooseya waxay la kulmaan halis sare oo nafaqo-darro ah inta lagu jiro waqtiyada cunto yarida ay jirto.


Pedram Yazdi/ICRC

Mid ka mid ah Xarumaha xanaanada deg degga halkaas oo cunto lagu siiyo daryeelayaasha. Hooyooyinka iyo daryeeleyaasha xarunta ku sugan waxay helaan cunto seddex jeer maalintii. Inta ay halkaa ku sugan yihiin, waxay sidoo kale helaan tabobar ku saabsan nafaqada saxda ah iyo caadooyinka naasnuujinta. Marka ay ka baxaan waxaa la siiyaa malmalaato ka sameysan laws (plumpy'nut) oo loogu talagalay cunugga

# WAREYSI FOOL -KA- FOOL AH OO LALA YEESHAY MORENA BASSAN OO AH NAFAQO YAQAAN U SHAQAYSA ICRC

**S: Wax inooga sheega sheeg shaqadaada iyo wax yaabaha daruuriga u ah.**

**J:** Nafaqo yaqaanku wuxuu ka shaqeeya hagaajinta heerka nafaqada dadweynaha si looga hortago, loo daaweyo iyo looga bogsiiyo caruurta nafaqo-xumadu hayso, iyo sidoo kale haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya. Si loo helo macluumaad ku saabsan heerka nafaqada dadweynaha ku nool Soomaaliya, nafaqo-yaqaanku wuxuu si joogto ah sahanno nafaqo loo yaqaan 'SMART' ugu sameeya labadan kooxood.

**S: Sidee ay nafaqo-darrada ugu baahsan tahay Soomaaliya?**

**J:** Soomaaliya gudaheeda, guud ahaan heerka nafaqo-xumada ba'an waa mid sarreya, inta u dhaxaysa 10% ilaa 33% qaasatan waxay ka jirtaa xeryaha dadka soo barakacay iyo dadweynaha xoolo- dhaqatada ah. Saboolnimo, cunno yari iyo dhibaatooyin caafimaad ayaa saameeya kooxaha nugul sida bulshooyinka reer guuraaga ah, dadka gudaha ku barakacay iyo dadweynaha reer miyiga ah. Abaaro soo noqnoqda, daadadka iyo dhibaatooyinka amniga uma oggolaanayaan dadweynaha inay helaan sugnaan dhaqaale oo xasilloon. Sahayda cuntada oo ku saleysan caano iyo badar iyo helitaanka miraha iyo khudaarta, iyo sidoo kale hilibka, waa mid hooseeya taas oo horseedaysa tamar cunto oo aan ku filneyn in lagu daboolo baahiyaha tamarta dadweynaha.

Intaas waxaa sii dheer, inta badan caruurta lama naas nuujiyo sannadka ugu horreeya oo dhan iyada oo heerku si weyn hoos u dhacaya ilaa 15% marka canugu gaaro da'da labada sano. Mark ay gaaraan lix illaa sideed bilood, 8 ka mid ah 10-ka caruur ee Soomaaliyeed ayaa lagu bilaabaa cunnooyin adag, kuwa adag xigeen ah ama jilicsan. Bixinta cunto dheellitiran ayaa weli caqabad ka ah inta badan Soomaaliya. Dhalo ku quudinta, dhaqan laguma talinayo in la isticmaalo, ayaa ah mid hooyooyinka badankood isticmaala. Caqiidooyin dhaqameedku waxay saameyn weyn ku leeyihiin hirgelinta wanaagsan ee hababka hooyooyinka u quudiyaan dhallaanka iyo ilmaha yar. Dhacdada cudurrada faafa waa mid aad u sarreysa, heerarka tallaalkuna waa mid hooseeyaa. Xaalad caafimaad xumo ayaa sidoo kale sabab u ah nafaqo-darrada ba'an ee carruurta ka yar 5 sano iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya.

**S: Sidee u qiimeysaa xaaladda nafaqada meelaha aad ka hawlgashaan?**

**J:** Kooxda nafaqada ayaa sameeya sahan nafaqo loo yaqaan SMART si loo go'aamiyo heerka baahsanaanta nafaqo-darrada. Caruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood




Morena Bassan, nafaqo - yaqaan ka tirsan ICRC oo u adeegaysa bukaanno ku sugan xarunta xanaanada deg degga ee Kismaayo

iyo 5 sano ayaa la hubiyaa culeyskooda-dhererkooda-cabbirka wareegga cududda sare iyo sidoo kale barar labada lugood si looga baaro nafaqo-xumo. Xogta la uruuriyay waxay ka caawineysaa nafaqo yaqaanku inuu helo sawir cad oo ku saabsan heerarka nafaqo-darrada degaanka la qiimeeyay iyo fahamka baahiyaha gaarka ah. Sahamada nafaqada waxay inta badan muujinayaan in heerka culeyska yar la isbar-bardhigay dhererka (tabar-darraatin) ee caruurta ka yar 5 sano uu yahay mid aad u sarreeya. Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya waa gobollada caruurta si aad ah u saameysay nafaqo-darrada.

**S: Waxbarasho nafaqo ma qoys kasta ayaad u qabataa iyo immisa jeer ayaa la qabtaa?**

**J:** Waxbarashada nafaqada waxay barbar socota fulinta howlaha. Ka-faa'iideystayaashu waxay helayaan macluumaad ku saabsan sida cunto dheellitiran loo diyaarin karo iyadoo la isticmaalayo cuntada degaanka laga heli karo. Sidoo kale waxaa lala wadaagaa macluumaad ku saabsan cuntada saxda ah ee loogu talagalay dhallaanka iyo caruurta yar yar. Waxaa sidoo kale la siiyaa feejignaan dheeri ah cuntada haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya si loo hubiyo inay awoodaan inay ku dhaqmaan naas nuujin kaliya 6-da bilood ee ugu horeya nolosha dhallaankooda.

**S: Adeegyada nafaqada ma laga heli karaa dhammaan xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas?**

**J:** Maya. Adeegyada nafaqada (daaweynta nafaqo-

xumada ba'an iyo tan dhexdhexaadka ah) waxaa keliya laga heli karaa qaar ka mid ah xarumaha bukaan-socodka Ururka Bisha Cas. Meelaha ICRC aan ka hawlgalin daaweynta nafaqo-darrida, hay'ado kale oo samafal ah ayaa gobolladaas wax ka qabtaan. Sidaa darteed ma aragno baahida loo qabo in isla shaqadii la qabto.

**S: Sideed ku hubiysaa in caruurta nafaqo-darradu hayso ay helayaan kaalmada lagama maarmaanka ah?**
**J:** Marka la aqoonsado cunugga nafaqo-xumadu hayso inta lagu guda jiro baaritaanka, sahaminta nafaqada ama la-talinnada caafimaadka ka dib waxaa loo gudbiyaa xarunta bukaan-eegtada Bisha Cas oo bixisa barnaamijka daaweynta nafaqo-darrada ee bukaan-socodka iyo barnaamijka quudinta qaaska iyo dheeriga ah si loo daaweyo. Intaa waxaa sii dheer, waxaan xarumaha nafaqada u bixinnaa cunto nafaqo daaweyn ah, daawooyin iyo waxyaalo kale ee lagama maarmaanka ah oo ay u baahan karaan.

**S: Wax inooga sheeg mashruuciisa tijaabada ah ee Barnaamijka Quudinta Qaaska iyo Dheeriga iyo meelaha laga hirgeliyo.**
**J:** Mashruuca tijaabada ah ee lagu daweynayo nafaqo-xumada dhexdhexaadka ah ee carruurta ay da'doodu ka yar tahay 5 sano iyo haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya ayaa bishii Abriil 2019 laga bilaabay magaalada Baydhabo (gobolka Baay), Kismaayo (gobolka Jubbada Hoose) iyo bisha Luulyo 2019 Baardheere (Gobolka Gedo. ICRC-da waxay maareysaa xarumaha xanaanada deg degga ee Baydhabo iyo Kismaayo halkaas oo lagu daweeyo bukaannada qaba dhibaatooyinka la xiriira nafaqo-xumada ba'an. Mashruuca tijaabada ah ayaa ujeedkiisu yahay in la bilaabo daweynta xaaladaha nafaqo-xumo dhexdhexaad ah ka hor inta ayan noqon mid daran, iyada oo la raacayo tilmaamaha Maaraynta isku-dhafan ee Nafaqo xumada daran (IMAM) ee Soomaaliya. Daaweyntani waxay muhiim u tahay joojinta wareegga xun ee nafaqo-xumada. Markii cunuggu gaaro heerka daran ee nafaqo-xumada, wuxuu u nugul yahay cudurro kale oo halis ah oo u horseedi kara dhimasho haddii aan dhakhso loo daaweyn. Waxaa wanaagsan in la ogaado in daaweynta nafaqo-xumada dhexdhexaadka ah ay yareynayso tirada xaaladaha nafaqo-darrida ba'an ee carruurta iyo in ay yareynayso heerka dhimashada carruurta.

**S: Maxay yihiin caqabadaha qaarkood ee aad la kulantay ilaa iyo hadda fulinta mashruucan tijaabada ah?**
**J:** Caqabada ilaa iyo hada ee hirgalinta mashruucan waa saadka keliya. Xaaladda nabadgelyada ee Soomaaliya ayaa mararka qaar nagu adkeynaysa inaan cuntada iyo alaabada kale gaarsiinno xarumaha caafimaadka ee Ururka Bisha Cas.

**S: Fadlan wax dheeraad ah ma noo sheegi kartaa tilmaamaha Maaraynta isku-dhafan ee Nafaqo-xumada daran (IMAM)?**
**J:** Tilmaamaha Maaraynta isku-dhafan ee Nafaqo-xumada daran (IMAM) ee Soomaaliya waa tilmaamo qaran oo ay diyaariyeen hay'adaha caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo Wasaaradda Caafimaadka. Tilmaamaha ugu horreeya ee IMAM ee Soomaaliya waxaa sanadadii 2011/2012 iyo sannadka 2019 daahfuray Wasaaradda Caafimaadka oo ay iskaashanayaan Ururada Aan Dowliga Ahayn ee Caalamiga ah (NGOs) waxaana dib-u- eegay QM.

**S: Waa maxay sababta cuntada noocyada kala duwan muhiim ugu tahay ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib uurka?**
**J**: Cunto kala duwan ayaa muhiim ah maadaama ay gacan ka geysaneyso ka hortagga nafaqo-xumada, gaar ahaan marxaladaha hore ee uurka. 1000-ka maalmood ee ugu horreeya inta u dhaxaysa uur-qaaadka iyo sanadka labaad dhalashada ilmaha ayaa loo aqoonsaday inuu yahay waqtiga ugu muhiimsan ee wax ka qabashada cawaaqibta nafaqo-xumada. Caddayn ayaa soo jeedisay in inta badan caruurta koritaankooda iyo horumarkooda raaga ah waa mid aan dib loo xalin karin wixii ka dambeeya 1000-ka maalmood ee ugu horreeya, taasina waxay horseedaysaa in koritaan iyo horumar raag ah ku faafo jiilba jiil - haweenka koritaankooda iyo horumarkooda ka soo xumaaday carruurnimada ayaa sii ahaanaya mid aan koreynin ayagoo qaan gaar ah, waxyna u jan-jeerayaan in ay dhalaan farac aan koreynin una horumareynin.

Arrin kale oo muhiim ah in la xuso waa markii la hagaajiyo nafaqada wixii ka dambeeya 1000-ka maalmood ee ugu horreeya taasi waxay kobcisaa koritaanka iyo sidoo kale cilado ku timaadda horumarka garashada oo xiriir la leh nafaqo- xumada hore. In kasta oo 1000-ka maalmood ee ugu horreeya ay tahay marxalad muhiim u ah wax ka qabashada ka-hortagga koritaanka raaga, koritaanka qoto dheer ee xawaare sare ayaa dhici kara sanooyinka dambe waxaana laga yaabaa inuu dib u dhigo raagidda koritaanka, qaasatan xilliga qaan-gaarka, tanina waxay soo bandhigeysaa fursad kale oo wax-ka-qabasho looga golleeyahay kala goynta wareegga is-dhaxalka jiilka ee nafaqo-xumada carruurta.

**S: Waaxda nafaqada maxay siisaa bulshooyinka soo foodsaarto nafaqo darro?**
**J:** Waxaan bulshooyinka, haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya iyo qoysaska carruurta leh oo da'doodu ka hooseyso 5 sano kuwaas oo nafaqo darro hayso siinnaa kaarar lagu qaato cuntada iyo cuntada nafaqada leh oo nafaqo darrida lagu daaweeyo. Intaa waxaa u dheer, waaxdu sidoo kale waxay bixisaa aqoon ku saabsan dabeecadaha raadinta caafimaadka iyo sidoo kale cunista cuntooyin habboon si looga hortago nafaqo-darrida.

# WAX SOO SAARKA MALABKA WUXUU KOR U QAADAYA ADKEYSIGA

Gobolka Sanaag waxaa ku yaala Galgala, oo ah magaalo buuraley ah oo hadhaagii hore ka muuqdaan. Dad aad u farabadan ayaa barakacay iska- horimaadyada dartood. Dadka ay dhibaatadu saameysey waxaa ka mid ah xoolo-dhaqato iyo qoysaska beeraha iyo shinnida ku hawlan, kuwaas oo lagu qasbay in ay u guuraan degaannada nabdoon.

Qaar ka mid ah dadka deegaanka ayaa noqotay in ay u guuraan xeryaha barakacayaasha ku yaala tuulooyinka dooxooyinka halka inta soo hartayna, badankood beeralay ah, ay ku hareen degaanadooda si ay daryeelaan beerahooda.

"Waxan beeraley ahay in ka badan 45 sano. Sanadahaan waxaa jiray xilliyo badan oo abaar iyo fatahaado ah. Laakiin, tani iguma khasbin inaan guuro. Tacbashada beeraha waa waxa aan si fiican u garanayo. Waa isha kaliya aan dakhligayga ka helo," ayuu yiri Cawil Maxamed, oo ah beeraley ku nool tuulada Mash-Caleed.

Ka sokow tacbashada beeraha, Cawil sidoo kale wuxuu dhaqdaa shinnida.

"Malabku waa daawo mar kasta oo qof xanuunsado, waxaan raadinaa badeecadan. Hadda, uma baahna inaan halgan u galo si aan u helo malab. Waxaa si sahal ah looga heli karaa beertayda. Waxaan ku heli karaa si fudud si la mid ah sida aan ku helo khudaarta," ayuu raaciyay.




ICRC waxay tababar siisaa shakhsiyaadka, waxayna bulshooyinka dhaqda shinnida ku taageertaa qalab.

ICRC waxay tababaro ku saabsan farsamooyinka dhaqashada shinnida siisaa shaqsiyaadka iyo bulshooyinka ay caawiso waxayna ku taageertaa qalabka sida sanduuqyo shinni casri ah.

Puntland gudaheeda, isticmaaka malabka qofkiiba waxaa lagu qiyaasaa 250 garaam ilaa in ka badan 500 garaam qofkiiba sanadkii. Qiimaha malabka waxaa lagu go'aamiyaa dalabashada, helitaanka, tayada, dabeecada gaarka ah, baakadeynta, asalka iyo qodobo kale.

Dadka shinnida dhaqda waxay si toos ah malabka uga iibiyaan dadka quuta ama si mug badan uga iibiyaan ganacsatada. Ganacsatada waa ay sifeeyaan malabka ayagoo kuluuleynaya, miiraya oo ku shuba dhalooyin. In kasta oo habka sifeyntu kordhiso qiimihiisa, malabku ma ahan mid saafi ah sidaa darteedna wuxuu luminayaa tayadiisa cusub. Hawsha noocan ahi waxay fiican tahay marka wax soosaarku ka badan yahay baahida degaanka, sababta oo ah waxay kordhisaa cumriga sheyga, waxay hagaajisaa soo bandhiggeeda waxayna suurta gelisaa dhoofinta. Baahida loo qabo malabka ayaa ah mid kor u socota isla markaana aan wax ku soo kordhineyn soo saarka maxalliga ah. Ganacsatadu waxay ku iibiyaan qiimo sare.

"Waxaan hadda helnay habab horumarsan iyo xirfado farsamo oo ku saabsan dhaqashada shinnida iyo sanduuqyada shinnida. Waxaan hadda leenahay awood aan ku kordhinno wax soo saarka malabka oo aan ugu badeli karno badeeco kale sida awlalka shinnida" Cawil ayaa intaa ku daray.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_afrique
blogs.icrc.org/Somalia

**Ergada ICRC Soomaaliya**
Wadada Denis Pritt
S.B 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nayroobi, Kenya
www.icrc.org
Sawirka gerbedka: Abdikarim Mohamed/ICRC
© ICRC, Janaayo 2020

ICRC

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

2020.1182/402 01.2020 3000